

# Guddoonka Dugsiyada Degmada Toronto

(Sida looga tarjumay Ingiriiska)

Policy P.036

Cinwaan: **CASHARRADA GURIGA LOOGA SHAQEYO (HOMEWORK)**

La hirgaliyay: (Adopted) November 24, 1999, **April 16, 2008**

(Ku rogaal celin): (Revised)

Dib u falanqeyn (Review)

## CINWAAN: CASHARRADA GURIGA LOOGA SHAQEYO

### 1.0 UJEEDOOYINKA

Si loo aasaaso waxay Guddoonku ka aaminsanyihiin casharrada guriga looga shaqeyo, inuu yahay mid hawl-galinaya oo ku habboon afcaasha waxbarashada; In la sugo ballaanqaadka Guddoonka ku lug leh casharrada guriga looga shaqeyo, kuna saleysan qorshe ujeedo cad leh si toos ahna u xiriirinaya banaamijyada waxbarashada dugsiya ardeyda laga filayo Manhajka Onteriyo.

### 2.0 QEEXID (DEFINITIONS)

*Casharrada guryaha looga shaqeyo, waa khibrado waxbarasho oo fasallada ka baxsan. Macallimiintuna waxay ugu talagaleen inay kor ugu qaadaan waxbarashada ardeyga / da; Casharrada guryaha looga shaqeyo waa inay macallimiintu arkaan si ay ula socdaan halka ardeydu hadda marayaan iyo si ay dhinaca wanaagsan ugu jiheyn lahaayeen ujeedada waxbarashadooda.*

*Afar nooc oo casharrada guryaha looga shaqeyo oo loogu talagalay ayaa jira; mid walbana waxaa loogu talagalay inay ka soo baxana ku saleysnaado dano kala duwan oo laga filayo sida hoos ku xusan:*

<u>Nooca</u>	<u>Qeexitaanka</u>	<u>Waxa laga filayo inay ka soo baxaan</u>	<u>Isticmaalka (Application)</u>
<b>Dhameystir</b>	Shaqo kasta oo lagu talagalo xilliga maalmaha dugsiya oo fasalka aan lagu dhammeynin.	Ardeyda ayuu ku kaalmeynayaa inuu si joogta ah ula socodsiiyo barnamijyada fasalka	Baarnaamijka fasalku waa inuu ahaado mid ka soocan, haddii ardeygu casharrada guriga looga shaqeyo si caadiya u dhammeynayo

<p><b>Leyli ama Ku celcelin</b></p>	<p>Shaqo kasta oo lagu roogal celinayo laguna xoojinayo khibradaha iyo mabaadi'da fasalka lagu barayo</p>	<p>Wuxuu ardeyda ku kaalmeynayaa inay ku leyliyaan khibradaha cusub o ay hanteen inay heer wanaagsan ka gaaraan.</p>	<p>Inuu ahaado mid saameyn ku leh Leyliga casharrada guriga looga shaqeeyo ardeyda looga baahanyahay, in hadda ka hor si gaar ahaaneed awood u siinayay inay sameeyaan kartina u yeeshaan khibradaha looga baahanyahay,</p>
<p><b>Diyaargarow</b></p>	<p>Shaqo kasta oo ardeyda u diyaarinaya casharrada ku soo fool leh ee fasalka.</p>	<p>Ku dhiirigalinayaa ardeyda inay hantaan xogta aasaasiga ama la yimaadaa aqoontooda iyo khibradooda hore si ay ugu adeegsadaan qeybaha waxbarashadooda.</p>	
<p><b>Fidin/ kordhin</b></p>	<p>Shaqo kasta oo Sahaminaya oo sifeynaya waxbarashada macnaha guud ama isu keenaya isla markaasna ballaaranaya waxbarashada fasalka</p>	<p>Ardeyda ku dhiirigalinayaa ina dhibaatooyinka ka salgaaraan, iyo inay u fikiraan si wax ku ool ah iyo si aad ah u fikiraan (critically)</p>	<p>Inay ahaado mid wax u taraya, loomana baahna in la kordhiyo casharrada guriga looga shaqeeyo si gaar ahaana loo barto manhajku wuxuu ka kooban yahay, taas badalkeedana, ardeydu waa inay si qoto deer leh fahamkooda u kordhiyaan iyo inay waxbarashadooda la xiririyaan dunida dhabta ah.</p>

### 3.0 NIDAAM ama QORSHE HAWLEED (POLICY)

#### Casharrada guryaha looga shaqeeyo ee wax ku oolka ah ee loogu talagalay:

- 3.1. Casharrada guriga looga shaqeeyo oo loo xilsaaray, waa inay ahaadan kuwo si qayaxan oo isku lammaanan oo taxadar leh loo qorsheeyay, iyo inay ka mid noqdaan oo talo ka geystaan kuwa ugu muhiimsan ama aasaasiga, isbadalaya ama wareegeysanaya iyo macallimiinta maadooyinka, meeshii looga baahdoba. Sidoo kalena meelaha ugu habboon, xilka casharrada gurigu waa inuu ka soocnaadaa si uu u muujiyo baahida gaarka ee ilmaha.

- 3.2. Ujeedada nooc kasta oo casharrada guriga ah waa in lagu hubiyo, in labaduba ay ahaadaan kuwa wax ku ool ah iyo kuwa qaayo sare uleh waxbarashada ardeyda iyo guulaha iyo barbaarinta loo damacsan yahay in loo joogteeyo waxbarashadooda. Xilka casharrada guriga looga shaqeeyo oo wax ku ool ahi waa:
- (a) Waa kuwa manhajka ku saleysan oo daboolaya sare u qaadidda iyo baahida gaar ahaaneed ee ardeyda taasoo oo loo marayo kala soocnaantooda iyo habeyntoodaba.
  - (b) laga faaloodo si looga helo natiijo waxbarashada mustaqbalka
  - (c) Loo farsameeyay inay u baahdaan barasho dheeraad ah oo fasalka ka baxsan inay ku hawl galiyaan iyo inuu noqdo mid ku habboon waxbarashada ardeyda. Ardeyduna ay fahamsanyihiin waxa laga filayo ka hor intayna dugsiga ka tagin.
  - (d) Una baahneyn tab ama farsamo kale oo ardeydu laga yaabo inayna awoodi karaynin.
  - (e) Laga yaabaa in loogu talagalay inay ka mid noqdaan waalidiinta/ daryeelayaasha oo ku kaalmeynaya waxbarashada ilmahooda, haseyeeshe ayna baraynin mabaadii' cucub.

### **Cawaaqibta dhammeystir-la'aanta xilka casharrada guriga looga shaqeeyo**

- 3.3. Meelaha ku habboon, cawaaqib xumo joogta ah ayaa ka jiri doonta, marka casharrada guriga looga shaqeeyo aan la soo dhammeystirin. Ganaax lagu qaado kuma habboona kaas oo dhaxalsiin doona dhiiri-galin la'aan daran.

### **Ka warbixinta casharrada guriga looga shaqeeyo**

- 3.4. Casharrada guriga looga shaqeeyo waxaa lagu warbinayaa oo kaliya, qeybta barashada xirfadaha ee Kaarka Warbixinta Dugsiyada Hoose ee Gobolka, arrintaas oo qeyb ka ah Dhammeystirka Shaqada Gaarka ee Casharrada Guriga looga shaqeeyo iyo Kaarka Warbixinta Dugsiyada Sare oo qeyb ka ah Shaqada gaarka iyo Shaqada la caadeystay ama Casharrada Guriga looga Shaqeeyo.

### **Wakhtiyeenta, Jadwaleynta iyo Tayada Casharrada Guriga looga shaqeeyo**

Qiyaasta xilka casharrada guriga looga shaqeeyo ee ardeyda waa inay kala duwanaadaan kuwa dugsiyada hoose, kuwa dhexe iyo kuwa sare, iyo sidoo kalena qiyaasta wakhtiga ay ardeydu kaga shaqeynayaan casharrada guriga looga shaqeeyo, kuwaas oo ku saleysan baahida ardeyda, awoodda barashada, maadada, jadwalka dugsiga, soo dhawaanshaha Tijaabooyinka (Tests), Imtixaanada iyo wakhtiga la iska rabo xilalka casharrada guriga looga shaqeeyo; Wakhtiga la galinayo casharrada guriga looga shaqeeyo waa inay ahaadaan kuwo isku-dheelitiran, iyada oo la tixgalinayo ahamiyadda qofka iyo daryeelka qoyska iyo waajibbaadka guud ee qoyska ku caam ah bulshadana maanta.

3.5. **Barbaarinta** - (Kindergarten)

Ardeyda Barbaarinta waa inaan loogu talagalin casharrada guriga looga shaqeeyo. Waxaana jira xiriir adag oo waalidiintu uga qeyb qaadanayaan guusha ardeyda. Sidaas darteedana, waxaa qoysaska lagu dhiirigalinayaa, inay ku hawshoonaadaan waxqabadka barashada hore: sida ciyaaraha, hadalka iyo Akhriska wadajirka ee Ingitiiska ama afka hooyo; Macallimiintu waxaa laga yaabaa, inay siiyaan qalab ama ra'yi si ay ugu kaalmeeyaan hawlaha barashada qeybta hore ee guriga ku saleysan.

3.6. **Fasallada 1 illaa 6**

Xiriir adag ayaa ka dhaxeeya akhriska maalin kasta ee afka Ingiriiska ama afka hooyo loogu akhrinayo caruurta dugsiyada hoose iyo guusha ardeyda; Sidaas darteedana, casharrada guriga looga shaqeeyo ee loogu talagalay badanaaba waa inay ahaadaan qaab akhris, ciyaaro kala duwan, wada falanqeyn hawlaha wax wada qabsiga, sida dhisidda iyo qoyska oo cunto lala karinayo. Dabayaaqada, fasallada aasaasiga iyo kuwa dhexe (**junior**), casharrada wax ku oolka ee guryaha looga shaqeeyo, waxaa laga yaabaa inay ku bilaabmaan qaab shaqo gaar ahaaned ah. Labada siyaaboodba, casharrada guriga looga shaqeeyo oo loogu talagalay in la soo dhameeyo, lagu leyliyo, la isu diyaariyo ama mudada loo dheereeyo, waa in si cad oo qayaxan loo kala soocaa si loogu muujiyo baahida kaliya ee ilmaha

3.7. **Fasallada 7 illaa 8**

Dhammeystirka casharrada guriga ee ardeyda da'da dugsiya dhexe, wuxuu ka qeyb qaadanaya inuu sare u qaado guusha ardeyga/da; Casharrada guriga loogu talagalay in lagu dhammeystiro, lagu leyliyo, la isugu diyaariyo ama mudadana ardeyda fasallada 7 illaa 8si loogu dheereeyo, waa in si cad oo qayaxan loogu qorsheeyaa, iyada oo lala kaashanayo macallimiinta assaasiga ah iyo kuwa doorka ka qaata [wareega] (**rotary**). Qiyaasta wakhtiga lagu dhammeynayo waa inuu ahaadaa hal saac ama wax ka yar.

3.8. **Fasalka 9 illa 12**

Dhammeystirka casharrada guriga waxay ka qeyb qaadan karaan guusha ardeyga/da, gaar ahaana fasallada sare; Ku talagalka casharrada guriga ardeyda fasallada 9 illaa 12 ay, waa inuu ahaadaa mid cad oo qayaxan oo si taxadar leh loo qorsheeyay kuna dhammaado muddo laba saacadood ama wax ka yar; Casharrada guriga looga shaqeeyo culeys ayay ku leeyihiin oo gaar ahaan caan ku yihiin qoysaska caruurtoodu ay uga kala gudbayaan dugsiyada heerarka marxaladaha muhiimka ah. Sidaas darteeda, casharrada guriga ee gaar ahaan loogu talagalay ardeyda fasalka 9aad, waa in si taxadar leh loogu qorsheeyaa, iyaga oo macallimiinta casharradu ay iska kaashanaya

### **Guud ahaan**

- 3.9. Waa in aan casharrada guriga looga shaqeeyo, loogu talagalay maalmaha fasaxa ah sida ku xusan agandada sannada dugsiiyeedka ama maalmaha muqadaska ah.
- 3.10. Meelkasta oo ay suura-gal tahay, Casharrada loogu talagalay in guriga looga shaqeeyo waa in loo sameeyaa wakhtiyo u dhaxeeya oo lagu soo celinayo, si qoysaska ay si wanaagsan ugu kaalmeeyaan dhammeeytirka casharrada guriga iyaga oo culeys saaraya wakhtiga uu u baahanyahay in lagu dhameeyo casharradaas, iyaga oo ku kordhinaya waxoogaa yar oo waxqabad ah dhinaca jadwalka manhajka hawlaha maalin dugsiiyeedka ka baxsan iyo hawlo kaalmeeynaya daryeelka qofka iyo qoyska.
- Waalidiinta filaya dareena ka qaba casharrada guriga looga shaqeeyo oo ilmahooda la siiyo, waa in lagu dhiiri galiyaa in ay la xiriiraan macallinka ilmahooda ama maamulaha dugsiga si ay xaaladda uga wada xaajoodaan
- 3.11. Waxaad kale oo eegtaan nidaamka (xeerka) P063: Qaraarka lagu joojinayo baaritaanka ka hor, kuna lug eh waxqabayada muhiimka ah iyo hawlahaas, oo la hirgaliyay June 27, 2007.

### **Casharrada Guriga looga shaqeeyo mudada fasaxa dheer lagu maqan yahay**

- 3.12. Macallimiinta waa in aan laga filan inay siiyaan hawlo ballaran ama dheeraad ah ee fasalka iyo kan gurigaba oo ardeyda loogu talagaleen inay ka shaqeeyaan marka ay dugsiga muddo dheer ay ka maqanyihiin, taasoo u sabab ah arrimaha qoyska ama maqnaashada waalidka ku lug leh. Maqnaashaha u sabab ah jiro dheer, waalidiinta waxay la xiriiri karaan maamulaha dugsiga si ay uga wada xaajoodaan fursadaha la helikarayo.

### **Doorka iyo Masuuliyadda**

- 3.13. Guri-dugsiiyeedka dhabta ah ee ka dhaxeeya kawa ku shuraakoobay (partnership) , wuxuu ardeyda guushooda ku yeelan karaa, saameyn wax ku ool ah oo qaabka casharrada guriga looga shaqeeyo
- (a) **Shaqaalaha Dugsigu Waxay Masuul ka yihiin:**
- (i) Isgaarsiinta ilmaamaha casharrada dugsiga ee guriga looga shaqeeyo ee horraanta sannada dugsiiyeedka oo ay adeegsanaya macallimiinta, waalidiinta iyo ardeydaba
- (ii) Abaabulka kheyraadka dugsiga iyo gargaarka leyliga casharrada guriga looga shaqeeyo, tsle. Isticmaalka ajandada, qalabka maktabadda, gargaarka barnaamijyada maadiga, dib u hubinta wax ku oolka isgaarsiinta ka dhaxeeya macallimiinta isbadasha, si shaqo suurto-gal ah oo casharrada guriga loogu talagalo, iyo

(iii) Xogwarran waalidiinta laga siiyo ujeedooyinka wax ku oolka ee casharrada guriga looga shaqeeyo iyo inay wadaagaan Leyligan oo ku kaalmeynaya qoysaska si ay u caawiyaan ubadkooda (Tusaale ahaan: warsidaha (newsletter), isu-imaatinka iyo shabaqadaha Internetka)

(b) **Macallimiintu waxay masuul ka yihiin:**

(i) Dhiirgalinta inay jaalayaashoodu ku dhiiri galiyaan qoysaska iyo ardeyda, kaasoo horumarinaya isgaarsiin joogto ah oo wakhtiga ku saleysan iyo gargaarka qoysaska ee qaabka casharrada guriga looga shaqeeyo.

(ii) Loo farsameeyo casharrada guriga loo siiyo oo si cad u qeexaya ujeedooyinkooda iyo waxa la filayo inay ka soo baxaan;

(iii) In la isla wadaago waxa laga filayo casharrada guriga looga shaqeeyo ardeyda iyo waalidiinta ee horraanta sannad dugsiyeedka.

(iv) In la hubiyo casharrada guriga looga shaqeeyo ee loogu talagalay inuu si toos ah ula xiriiro tilmaan bixinta fasalka iyo inuu ka koobnaado oo ahaado mid aan mugdi ku jirin, ujeedana leh isla markaasna ku hawshoon waxqabad.

(v) loo xilsaaro casharrada guriga kaasoo ah mid ku habboon da'da ardeyga/da, kobcinta heerka, barashada qaabka, khibradaha iyo baahida gaarka ee qofka;

(vi) xirfadaha ay u baahanyihiin in la baro si ardeydu u dhammeystiraan casharrada guriga iyo inay noqdaan kuwa iskooda wax u baranaya oo guuleysta, iyo

(vii) in laga hadlo oo si taxadar badan loo qorsheeyo casharrada guriga iyadoo lala kaashanayo macallimiinta aasaasiga iyo kuwa doorka ka qaata.

(c) **Ardeydu waxay masuul ka yihiin:**

(i) In la hubiyo inay si toos ah u fahmeen casharrada loo xil saaray ee guriga looga shaqeeyo, kana mid ah, waajibaadka, heerka go'aan ka gaaridda (Criteria) iyo wakhti ku imaatinka (timeline) iyo inay macallinka/da faahfaahin ama kaalmo weydiistaan marka casharrada guriga looga shaqeeyo la siiyo ama waxa laga filayo ayna u caddeyn.

(ii) ku diiwan galiyo/so ajadadiisa/deeda ama xasuus qorka ardeyga;

(iii) inta awoodooda ah inay si caadiya casharrada guriga looga shaqeeyo wakhti ku dhammeystiraan; iyo

- (iv) inay isku dubaridaan wakhtiga iyo qalabkooda, tsle. Iyaga oo guriga keenaya qalabka loo baahan yahay.
- (d) **Qoysku waxay masuul ka yihiin:**
  - (i) Akhriska Ingiriiska, Faransiiska (French Immersion) iyo /ama afka hooyo, inta ay ku jiraan sannadaha dugsiga hoose ee waxbarashada caruurtooda;
  - (ii) in loo yeelo bi'ad, kaasoo ah, meel ay ku shaqeeyaan, wakhti xadidan oo aan kala go' laheyn, caadi ahaanna guriga ama meel kale loogu badalo, sida ururka casharrada guriga looga shaqeeyo (Homework club) oo casharrada guriga lagu qabto.
  - (iii) la dhiirigaliyo lana siiyo kaalmo ku habboon iyagoon ilmahooda uga shaqeynaynin casharrada guriga looga shaqeeyo;
  - (iv) in la siiyo qaab wanaagsa oo dheelitiran oo u dhaxeeya casharrada guriga, hawlaha la xiriira manaahijta iyo ballan qaadyada qoyska
  - (v) inay caruurtooda ka joojiyaan dhammeestirka casharrada guriga looga shaqeeyo wakhtiga la seexanayo, xataa haddii ilmuhu uusan / aysan dhammeynin; iyo
  - (vi) in lala xiriiro macallinka/da fasalka haddii ilmuhu si joogta ah iskiisa / iskeeda aysan u dhammeynaynin casharrada guriga looga shaqeeyo ama haddii ay dhib ku yihiin ama su'aalo ka dhasho.

#### **4.0 TILMAAMO GAAR AHAANEED**

Agaasimaha Waxbarashadu wuxuu awood u leeyahay, inuu soo saaro qaab xulasho ah (ikhtiyaari), si loo hirgaliyo nidaamka ama qorsho hawleedka (policy)